BARNE- OG FAMILIEDEPARTEMENTET

Wasaaradda carruurta iyo qoyska

Qorshe-waxqabad

Waxa soo saaray Wasaarada caruurta iyo qoyska
Postboks 8036 Dep, 0039 Oslo

Xafiisyada dowlada buugan waxa ay ka dalban karaan:
Madbacadda dowlada (Statens trykksakekspedisjon)
Ama e-mail ahaan amaba fakis.
e-mail: ste-bestilling@ft.dep.no
Faks: 22 24 27 86
www.bfd.dep.no

Kuwa kale (aan ahyen xafiisyo dowladeed)
waxa ay ka dalban karaan:
Akademika, Postboks 8134, Dep 0033 Oslo

Dalabkanambarkiisa: Q-1012 SOM

Sawirada bogga hore: Leif Gabrielsen

Qorshaha waxqabadka xukuumadda ee ka hortaga naafeynta xubinta taranka

Waxa Norway ruxay ogaanshaha waqtigan danbe ee naafeynta xubinta taranka dumarka. Wararka ay soo shaaciyeen saxaafada ee ku saabsan naafeynta xubinta taranka gabdhaha yaryar iyo aragtida laga qabo caadadan waa wax naxdin leh. Xadgudubka noocaan ah waa in lala dagaalamaa, howshan haatan meel sare ayay kaga jirta ajendaha siyaasada.

Naafeynta xubinta taranka wuxuu ka soo horjeedaa saldhiga xuquuqda beni'aadanka sida in aan daka lakalasoocin, xaquuqda nolol khaaseed ka ah iyo xaquuqda caafimaadkaba. Naafeynta xubinta taranka waxa uu Norwey ka ahaa mid ciqaab muddo dheer ah lagu muto. 1995 waxaa la soo saaray sharci u gaar ah ee diidaya naafeynta xubinta taranka dumarka. Danta laga leeyahay sharcigan waxuu ahaa in si cad loo muujiyo in masuuliyiinta norweejiga ay ka fogaanayaan naafeynta xubinta taranka dumarka. Sharcigu waa mid aan sidaa loo aqoon, shaqaalaha norweejigana uma tababarna in ay ka hortagaan mushkiladan inta aysan dhicin ama in ay kuwa horay looga naafeeyay xubinta taranka siyaan kaalmeeyn borofoshinaal ah. Sidaas darteed Warbixin iyo aqoon-isu-gudbin waa wax aad muhiim u ah qeyb weyna kaga jira qorshahan waxqabad.

Si looga hortago mushkiladan waxaa lagama maarmaan ah iyadoo si furan looga waramayo kordhinta feejignaanta dadweynaha, shaqaalaha caafimaadka iyo kuwa ku dhaqama caadadan – wax alla wixii dhaawac jireed iyo nafsadeed ee uu leeyahay. Tani waxey doonaysaa hawlgal dhaqdhaqaaq leh ee xagga hoggaamiyayaasha siyaasada, xirfadaha iyo kooxaha ay khuseyso. Dadka ka tirsan qolooyinka arrintan ay taabaneyso waxay helayaan awood saameyn aad u weyn iyo fursado ah kahortaga marka loo fiiriyo wakiilada mujtamac weynaha. Sidaas darteed xukuumada waxay culeys weyn saareysaa ka qeybgelinta kooxaha ay taabaneyso arinta si ay u fuliyaan talaabooyinka kala duwan.

Qeybaha ugu weyn ee qorshaha waxqabadka waxaa loo fulinayaa si mashruuc ahaan ah oo soo saarayo buugag, karti abuuris, aqoon kordhin iyo in si cad loo tijaabiyo hababka looga hortagayo naafeynta xubinta taranka. Sidoo kale dadaalka xukuumada ay ugu jirto qaranka gudaiisa waxaa iyana muhiim ah in la garbiyo dadaalada caalamiga ah. Taasi awadeed waa la xoojinayaa wadashaqeynta laba-dhinaclaha ah ee lala leeyahay dalalka Afrika ee ka shaqeya ka hortaga naafeynta xubinta taranka dumarka.

Kooxo dumar ah ayaa waa hor bilaabay hawsha la xiriirta arrintan oo innti muddo ahba waday, gabdho dhalinyaro ahna banaanka ayey isa soo dhigeen oo bilaabeen dagaalka si cad oo muuqata bey'adooda gudahoodba. Kuwani waa dumar ad-adag, fiican oo kartina leh oo wax doonaya, laakiin isla markaas u baahan kaalmo si ay u gaaraan goosha aragtidooda iyagoo jooga dal shisheeye. Qorshahaan waxqabad wuxuu noqonayaa kaalmo ku sii jeeda dadaalkeena aan ugu jirno la dagaalanka naafeynta xubinta taranka dumarka.

Karita Bekkemellem Orheim

Hordhac 3

Cutubka 1
Furitaan 5

Cutubka 2
Xaqiiqada naafeynta xubinta taranka gabdhaha 7
Sababaha loo naafeyo xubinta taranka gabdhaha 7
Noocyada naafeynta xubinta taranka 7
Asalka iyo baaxada 7
Dhibaatooyinka caafimaad ee uu keeno 8
Wadashaqeynta ay Norwey la leedahay ururada caalamiga ah 8
Kaalmada la siiyo ururada ikhtiyaariga ah iyo urur goboleedyada 8

Cutubka 3
Sharciyada iyo cahdiyada 9
Aragtida xuquuqda beniaadanka 9
Sharciga ka soo horjeeda naafeynta xubinta taranka 10

Cutubka 4
Talaabooyin waxqabad 11
Goosha 1: Ka hortaga ah in gabdhaha deggan Norwey laga naafeeyo xubinta taranka 11
Goosha 2: Kaalmeynta gabdhaha iyo dumarka horay loo naafeeyay 14
Goosha 3: In lala shaqeyo ururada iyo dadkaba 16
Goosha 4: Ka qeybqadashada la dagaalanka naafeynta xubinta taranka caalamiga ah 17

Cutubka 5
Fulinta qorshaha waxqabad 18
Mashruuc ka qeyb ah qorshaha waxqabad ee ka hortaga naafeynta xubinta taranka 18
Mashruuc beeleed 18
Abaabulida mashruuca 18

Doodii dheereed 11 Oktoober 2000 uu yeeshay baarlamaanka wuxuu go'aamiyay in xukuumada la weyddiiyo inay ka soo shaqeyso qorshe waxqabad oo looga hortagayo naafeynta xubinta taranka. Xukuumada horay ayey u bilaawday hawshaas. Gg'aanka waxaa lagu caddeeyay in qorshaha waxqabad uu ka koobnaanayo waxyaaba ay ka mid yihiin arrimaha soo socda:

- *Muujinta iyo wanaajinta wadashaqeynta lala leeyahayururada iyo dadka ku howshan ka hortaga naafeynta xubinta taranka gabdhaha oo kamid ah bey'adaha ey khuseyso ee Norwey*
- *Warbixin la xiriirta naafeynta xubinta taranka gabdhaha uu mamnuuc yahay marka la eego sharcig norweejiga*
- *Talaabooyin ka hortag ah, oo ay kamid yihiin xagga caafimaadka iyo dugsiyada*
- *Xoojinta wadashaqeynta caalamiga ah ee la xiriirta arimahan.*

Qorshaha waxqabad waxaa lagu soo saaray wadashaqeyn ay yeesheen Wasaarada kaniisada, waxbarashada iyo cilmibaarista, Wasaarada degmooyinka iyo gobolada, Wasaarada cadaalada, Wasaarada arrimaha bulshada iyo caafimaadka, Wasaarada arrimaha dibada iyo Wasaarada carruurta iyo qoyska. Wasaarada caruurta iyo qoyska ayaa iskudubariday hawsha. Inta ay hawsha socotay waxaa lala xiriiray wakiilo ka socday ururada iyo beyadaha dadka laga tirabadanyahay iyo dad kale oo karti leh.

Qorshaha waxqabad wuxuu soojeedin loo dhanyahay oo ah sida xukuumada ay u doonayso inay u xoojiso ama u hormariso dadaalka loogu jiro ka hortaga naafeynta xubinta taranka gabdhaha. Qorshaha waxqabad waa in la fuliyaa muddo 3 sanno ah gudahood (2001-2003). Iyadoo ay saldhig u tahay khibrada laga helay Iswiidhan ayaa qeybta weyn ee dadaalka qorshahan waxaa loo abaabulaya si mashruuc ahaaan uuna waajibkiisu noqon doono inuu fuliyo oo wax muuqda ka dhigo qorshe starateejik ah oo iskudubaridaya hawsha ku sii jeeda kooxda ay saameyso arinta, haay'adaha kala duwan iyo soosaarida buugaga warbixinta iyo ka soo waramida hawsha.

Waajibaadka qorshaha waxaa loo kala qeybin doonaa waajibaad qaran iyo mashruuc goobeed. Mashruuca goobeed Oslo ayaa la dhigayaa fulinteedana Oslo ayaa lala shaqeynayaa Oslo.

Si lagu gaaro goolashaa waxaa loo baahanyahay staratejiyad wadaxiriir ah halkaas oo la abuurayo lana dhisayo xiriir balaaran oo lala leeyahay kooxaha ay taabaneyso arrinta iyo ururo-daneedyada oo ah kuwo qarameed iyo kuwo caalamiba. Waa in laga fekeraa wadahadal balaaran oo la isku dhaafsado khibradaha calamiga ah iyo kuwa qarankaba ee dhexmara ururo-daneedyada kala duwan ee Norwey iyo kuwa dalalka kalaba. Waa muhiim in xiriirku uu mabda' ahaan noqdo mid fidaya oo dadka ka qeybgelaya ay abuuraan oo wadaagaana warbixinta si ay u gaaraan garasho mideysan.

Qeexida erayga naafeynta xubinta taranka gabdhaha

Naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo dumarka waaxaa loola jeedaa wax alla wixii qaliin ah ee lagu jarayo qeyb ama dhamaan xubinta taranka, ama gaarsiinaya dhaawacyo kale xubinta taranka dumarka, sbabaha loo sameeyana ay yihiin mid dhaqan ama kuwa aan daaweyn aheyn.

Caddeyn eray

Buugagta iyo warbixinta naafeynta xubinta taranka waxaa la adeegsadaa ereyga ah naafeynta xubinta taranka iyo gudniin marba mid. Qorshaha waxqabad waxaa la doortay in la adeegsado erayga ay adeegsadaan ururada caalamiga ah oo waaweyn sida Qaramada Midowbay(QM) iyo qaar kamid ah ururada QM oo ka shaqeeya arrimahan, naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha ama iyadoo ingiriis ah "Female Genital Mutilation".

Waxaa iyadana muhiim ah in lakala saaro naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo gudniinka raga. Isla eray haddii aan u isticmaalno falalkan waxay u muuqan karaan in laga hadlayo isku shay, taas oo aan run ahayn iyadoo waxa lagu sameynayo gabdhaha ey aad uga balaaran tahay oo xag caafimaadna ay dhibaato keento. Dhinaca kale waxaa erayga naafeynta xubinta taranka

ka imaan kara mararka qaarkood falcelin kharaar marka loo eego gudniin. Sidaas darteed waa muhiim in shaqada ka hortaga naafeynta xubinta taranka gabdhaha ay caddahay erayga la isticmaalayo xaaladaha kala duwan. Qorshaha waxqabad wuxuu ku talinayaa adeegsida erayga mar walba keeni kara wadahadal wanaagsan ee xaaladda walba ee lagu sugan yahay.

Qorshaha waxqabad wuxuu ku jeedaa kooxaha in guul laga gaaro larabo side:

- Gabdhaha ku jira khatarta ah in laga naafeeyo xubinta taranka iyo waalidkooda/ cida xanaaneys
- Gabdhaha iyo dumarka horay looga naafeeyay xubinta taranka
- Ururada, degmada iyo kooxaha ka shaqeeya arrimahan
- Shaqaalaha heyadaha dowladda ee la kulma mushkiladan

Talaabooyinka qorshaha waxqabad wuxuu oofinayaa goolasha soo socda:

- Kahortagidda in gabdhaha deggan Norwey laga naafeeyo xubinta taranka
- Kaalmeeynta gabdhaha iyo dumarka horay looga naafeeyay xubinta taranka
- Abuuris wadashaqeyn dhexmarta ururada iyo dadka
- Ka qeybqaadad in naafeeynta xubinta taranka gabdhaha laga dabargooyo aduunka.

Naafeynta xubinta taranka gabdhaha wuxuu keena xanuun islamarkaaba ah iyo mid nolosha dhanbaba, iyo khatar ah dhibaatooyin caafimaad oo waara. Keddibna wuxuu dhimaa tayada nolosha oo ugu danbeyntii halis gelin karta nafta.

Sababaha loo sameeyo naafeynta xubinta taranka

Si ay hawsha ka hortaga naafeynta xubinta taranka ay horay ugu socoto, waxaa muhiim ah in la garto sababbaha ay haystaan dadka ku dhaqma caadadan, waa wax lagu dhaqmayay jiilal aad u badan, oo kamid ah sida nolosha loo habeeyo. Sababo kale oo la sheego waa wax xaqiiqadaba ka soo horjeeda taasoo ah inuu caafimaad u fiican yahay, islamarkaasna laga yaabee inaysan aqoon dhaawacyada caafimadeed oo ay keento kuwa ku dhaqma naafeynta xubinta taranka . Waxaa intaas dheer in qaarkood ay qabaan inay diinta fareyso arrintan. Halkan waxa looga hadlayaa waa tafsir gaar ah ee ah waxa ku qoran diinta.

Waxaa intaas dheer inay jirto garashooyin ah in naafeynta xubinta taranka ay u fiican tahay nadaafada, quruxda iyo naagnimada. Waxaa kaloo la yiraahdaa inay kordhineyso kacsiga la doonayo iyo taranka, isla markaana ka ilaalineysan kacsiga aan la doonayn. Raacista caadada waxey keeneysa ka tirsanaan, iyo qofka oo lagu darayo bulshada. Marka naafeynta xubinta taranka loo sameeynayo sida iyadoo qeyb ka ah caado khasab ah in la sameeyo si looga baxo carruurnimada looguna darsamo dadka waaweyn, waxaa loo garan karaa sida xaqiijin bislaasho. Naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo dumarka waxaa loo arki karaa sida nooc xakameyn xagjira ee kacsiga dumarka. Xakameynta kacsiga dumarka wajiyo badan buu leeyahay oo waa ka jirtay bulsho walba wakhti walba.

Hawsha ka hortaga naafeynta xubinta taranka ee gabadhaha iyo dumarka wey ka bilaabatay dalal badan oo afrikaan ah oo looga dhaqmo caadadan. Natiijooyinka ugu wanaagsan waxaa laga gaaray meesha laga bilaabay hawsha iyadoo la abaarayo sababaha dadka ay ugu dhaqmaan caadadan oo si tartiib ah looga shaqeeyay.

Noocyada kala duwa ee qaliinka

Naafeynta xubinta taranka dumarka ma aha eray cadd, laakiin waxaa loo isticmaalaa sida magac guud ee dhowr nooc oo qaliin ee lagu sameeyo xubinta taranka dumarka ee muuqda. Noocyada ugu khatarsan waxaa la jaraa qeyb kamid ah xubinta taranka ee muuqda (bishimaha siilka, kintirka), iyadoo xaalado qaarkoodna la isku tollo meelaha dhaawaca ah oo markaasna ciriiri uu noqda duleelka siilka. Noocan waxaa loogu yeeraa fircooni. Noocyada kala duwan ee naafeynta xubinta taranka waxa ay keenaan caaqibooyin kala duwan oo ku xiran hadba darajada khatarta ee qaliinka. Qaliinada midkoodna kama maqna khatar caafimaad. Guda u galka arrintan waxaa lagu talinayaa waddo-tusaha loogu talagalay shaqaalaha caafimaadka Norwey iyo dumarka ka shaqeeya caafimaadka ee Norwey oo uu soo saaray kormeerka caafimaadka dowladda 2000.

Aad bey u kala duwan tahay da'da lagu sameeyo qaliinka. Gabadha waxay jiri kartaa dhowr maalmood ama waxay noqon kartaa naag weyn.

Assal iyo baaxad

Lama hubo goorta iyo meesha caadadan naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo dumarka ay ka bilaabatay, laakiin waxaa laga hadlayaa caado soo jirtay dhowr kunn oo sano. Ma aha waxaan suurogal ahayn in caadadan ay ka timid meelo aan isku xirnaayn. Marka laga hadlayo naafeynta xubinta taranka maanta waxaa lagu xiriiriyaa guud ahaan fal ku tidacmay caadada, oo lagu sameeyo dhamaan gabdhaha da' qaarkeed jira. Maanta waxaa naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo dumarka looga dhaqmaa ugu horeyn dalal u fidsan sida suun kuna yaala qeybta dhexe ee Afrika, laakiin tani ma aha dhibaato afrikaan ah oo keliya, waxaa la sheegay xataa xaalado ka dhacay Asia iyo Bariga-dhexe. In badan oo dhulkaas ah waa dhul muslin, laakiin qaliinkan waxaa laga sameeyaa xataa dada diimo kale haysta sida masiixiga brotestanka, katolika, qudbiga iyo diin laawayaasha.

Hey'adda caafimaadka aduunka waxay ku qiyaastay in 100-140 milian oo dumar ah lagu sameeyay nooc kamid ah naafeynta xubinta taranka. Ururka wuxuu qiyaasayaa oo kale in qiyaastii 2 milyan oo dumar ah ay khatar ku jiraan sanad walba.

Norwey waxay dhibaatadan si gaar ah u taabaneysaa dad socdaal ku yimid dalka. Suurogal ma aha in la qiyaaso immisaa bey taabatay, Dhowr kamid ah dumarkan waxaa la guday ka hor inta aysan imaan Norwey. Tani waxay khuseysaa xataa qaar kamid ah gabdhaha yaryar, laakiin qaar ku koraya Norwey waxay khatar ugu jiri karaan in laga naafeeyo xubinta taranka.

Masuuliyiinta ma haystaan meel ay qabsadaan si ay uga hadlaan ilaa xadkee baa caadadan la sii wadaa kadib marka la yimid Norwey.

Gabdho dhalinyaro ah ee asalkoodu soomaali yahay ayaa soo bandhigay sheekadooda, waxaana ururada ka shaqeeya arrintan laga sheegay in ay dhacday in qaliinka lagu sameeyay gabdho deggan Norwey. Ma jiraan aqoon laga helay baaritaan ee ku saabsan dhulkan, laakiin waxaa jira sababo loogu maleen karo in gabdho qaarkood oo dhalinyaro ah lagu sameeyo naafeyta xubinta taranka.

Waxyeelada Caafimaad

Waxyeelada caafimaad ee naafeynta xubinta taranka oo islamarkaaba lala kulmo waxay noqon kartaa dhiigbax iyo xanuun. Maalmaha ku xiga waxaa imaan kara caalir iyo dhiigbax kale, oo argaggax keena marka ugu danbeysana loo dhinto. Lama yaqaan ilaa xadkee bay gaareysaa dhimashada.

Dhaawacyada wakhtiga dheer socon kara waxaa kamid ah dhibaatada kaadida, xanuun badan ee caadada iyo calool xanuun. Caalir waara iyo xataa waa la sheegay dhal la'aan aan lagu talogelin. Saameynta nafsi ahaan waxaa kamid ah jug maskaxeed iyo argaggax, oo wata murugo iyo qulub wakhti dheer socda. Qaliinka wuxuu keeni karaa xataa dhibaatooyin la xiriira kacsiga.

Saameeynta caafimaadeed waxay ku xiran tahay daweynta ay heleen dumarkaas, laakiin haddii uu jiro adeeg caafimaad oo tayo fiican aad baa loo yareen karaa waxyeelada uu geysanayo dhaawaca. Kuwii lagu sameeyay naafeynta xubinta taranka, waxay qabi karaan baahi weyn ee dawo iyo dhaqancelin. Sidaas darteed waa muhiim in shaqaalaha caafimaadka ay helaan aqoonta lagama maarmaanka ah ee dhulka si ay u qaabilaan dumarkan oo ay u siiyaan dawo raaligelisa, xannaano iyo ixtiraam.

Wadashaqeynta Norwey ay la leedahay ururada caalamiga ah

Norwey waxay garbisaa dhowr talaab oo dhowr-dhinacle ah ay u sii marto Qaramada Midowbay oo arrintan ay ugu jirto ajendaha, iyo kuwo laba-dhinaclaha ah oo noqon kara ururo ikhtiyaari ah oo ka shaqeeya dal looga dhaqmo caadadan ama iyadoo toos loo garbiyo ururo ka jira goobta. Norwey waxaa intaas u dheer iyadoo si waxkuool ah uga qeybgashay kulamo caalami ah, sida kulan sanadeedka QM iyo guddiga xuquuqda beniaadanka ee QM, hay'ada dumarka ee QM halkaas oo ariimaha dumarka iyo caafimaadka taranka, dilka dumarka iyo kalasooca iyo wax kale oo badan oo ay ugu jirto ajendaha halkaas oo lagu gaaray go'aamo si gaar ah ugu jeeda ciribtirka naafeynta xubinta taranka ee dumarka. Norwey waxay garbisaa hay'adda xuquuqda beniaadamka ee QM iyo hawlaheeda ay kamid yihiin xuquuqda gabdhaha iyo dumarka.

Xagga Norwey waaxa laga siiyaa kaalmo weyn oo guud UNFPA (Sanduuqa taranka dadka ee QM), UNICEF (sanduuqa caruurta ee QM) iyo WHO (Ururka caafimaadka aduunka) kuwaas oo kuligood ku leh barnaamijyo iyo mashaariic dalalka Afrika ee loo dan leeyahay ku xiriirsan caafimaadka dumarka iyo caafimaadka taranka, halkan ayay hoos imanaysaa naafeynta xubinta taranka dumarka. Seddexdaas urur waxay 1997 soo saareen war ay u dhanyihiin ee ku saabsan naafeynta xubinta taranka ee dumarka. Buugaas yari waxaa lagu turjumay af norweeji, wuxuuna ka kooban yahay taarikhda arrintan, bandhiga barnaamijka iyo talooyin la xiriira talaabooyin qarameed iyo kuwo caalami ah ba. Kaalmada norwey ay u geysaneyso ururada QM ma cayina waxa lagu qabanayo, laakiin arrimaha si gaar ah u xiiseeya waxa lagu soo qaadan karaa doodaha iyo tusaalooyinka siyaasadeed ee kala hormarinta shaqooyinka la qabanayo.

Marka laga hadlo kaalmada dhaqaale, waxaa misaaniyada hordhaca ah ee 2001 la soo jeediyay in si macno leh loo kordhiyo kaalmada la siinayo UNFPA iyo UNICEF.

Dhanka Norwey waxaa wadahadalka siyaasadeed ee soo socda oo lala yeelanayo ururadaas hoosta laga xariiqayaa muhiimada ay leedahay shaqada looga hortagayo naafeynta xubinta taranka.

Garabka loo geysanayo ururada ikhtiyaariga ah iyo kuwa goboleed

Norwey waxay garab siisay mashruucyo ka jira Afrika, sida National Committee for Traditional Practices in Ethiopia (NCPTE) oo wadashaqeyn la leh Organisation for Social Sceince Research in Eastern and Southern Africa (OSSREA). Wadashaqeyntani natiijooyinka laga helay waxaa kamid ah deraaso la xiriirta dhaawaca ay keeni karaan caadooyinka qaarkood. Waxaa intaa dheer in NORAD ay garbisay iyadoo u sii martay Fokus/kvinnefronten Inter-African Committee on Harmfull Traditional Practices (IAC), oo saldhigeedu yahay Etiopia xiriirna la leh 26 dal oo afrikaan ah. Waxaa kaalmo guud la siiyay International Planned Parethood Fedretion (IPPF) oo ah urur-daneed oo caalami ah oo hawshiisu tahay la dagaalanka naafeynta xubinta taranka ee dumarka ee Afrika.

Cutubkakan la xiriira sharciyada iyo cahdiyada waxaan dooranay inaan culeyska saarno aragtida xuquuqda beni'aadanka iyo sharciga mamnuucida naafeynta xubinta taranka.

Marka laga hadlo sharciyo, waxaa halka looga hadlayaa oo keliya sharciga mamnuucida naafeynta xubinta taranka, maadaama kani uu yahay udub dhexaadka hawshan. Sharciyo kale wey noqon karaan kuwa lagu dhaqmi karo ama ha noqoto marka laga hadlayo ka hortag in gabdhaha deggan Norwey laga naafeyo xubinta taranka, ama xaaladaha naafeynta xubinta taranka oo ay horay u dhacday. Tan waxaa looga hadlayaa cutubka 4, oo la xiriirta talaabooyinka waxqabad.

Aragtida xuquuqda beni'aadamka

Naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha waxay jebineysaa dhowr xuquuq aadami ah, oo ay kamid tahay xaqa caafimaadka iyo xaqa nolol khaas ah, waxayna ka hor imaaneysaa mabda'a ah inaan wax lakala soocin. Xuquuqda beniaadanka waxay ka difaaceysaa dadka in lagu sameeyo noocyada kala duwan ee qaliin meelaha khaaska ah. Tusaale ka mid qaliinka noocaas ah waa naafeynta xubinta taranka ee dumarka. Haddii dowlad aysan qaadan talaabo ku haboon oo ay gabdhaha kaga badbaadinayso in lagu sameeyo naafeynta xubinta taranka dowladaasi waxay jebisay wajibaadkeeda dhowrista xuquuqda beniaadanka.

Waajibaadka Norwey ka saara xuquuqda beniaadanka waxaa kamid ah ka sokow sharci habeynta qarameed xataa waajibka ah in lagu dhaqmo siyaasad keeneysa dhaawaca ugu yar ee caafimaadeed, iyadoo lagu qiimeeyay aragti caafimaadka mujtamaca. Marka tani waxay macnaheedu tahay in la qaato talaabooyin, oo xag aqoon iyo khibradba, keenaya in gabdhaha aan lagu sameeyn naafeynta xubinta taranka, iyo in dhaawaca caafimaadeed ee kuwa horay loogu sameeyay qaliinka uu u noqdo mid yar.

Xaqa caafimaadka waxaa habeeyay dhowr cahdi caalami ah. Cahdiga carruurta qodabkiisa 24 wuxuu maadinayaa xuquuqda carruurta ah inay helaan heerka caafimaadeed ee ugu sareeyay oo la heli karo. Dowladaha wax ka saxiixay cahdigan carruurta waxaa waajib ku ah sida uu qabo qodobka 24 lambarkiisa 3 iney qaataan dhamaan talaabooyinka waxkuoolka ah sidii loo ciribtiri lahaa caadooyinka dhaawaca caafimaadka carruurta. Sida uu qabo qodobka 12 ee cahdiga QM ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka qof walba " wuxuu xaq u leeyahay heer caafimaad jireed ama nafsadeed ee ugu sareeya ee la heli karo. Guddiga QM ee xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka wuxuu faaladiisa guud ee qodobka 12 aad ku sheegayaa in ay muhiim tahay in la qaato talaabooyin lagaga badbaadinayo dumarka iyo carruurta caadooyinka dhaawaca u keenaya caafimaadkooda. Guddiga wuxuu kaloo sheegayaa in xaqa caafimaadka uu ku jiro in qofka uu go'aansado caafimaadkiisa iyo jirkiisa iyo xaq ah xuriyada qaliin jireed. Xataa guddiga dumarka, oo kormeera cahdiga dumarka ee QM, iyagoo ka hadlaya warbixinada dowladaha qaarkood ayay dhowr jeer soo jeediyeen su'aalaha la xiriira nafeeynta xubinta taranka. Sida la ogyahay waa labada cahdi ee QM oo kala ah midka xuquuqda Dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka iyo kan ah xuquuqda rayadka iyo siyaasada oo uu la socdo cahdiga xuquuqda beniaadanka ee yurub kuwa lagu dhafay sharci dejinta norweejiga ee sharciga xuquuqda beniaadanka ee 21 Maajo 1999. Intaas kedib waxaa laga shaqeeynayaa sidii cahdiga carruurta iyo cahdiga dumarka loo dhexgelin lahaa sharci dejinta.

Naafeynta xubinta taranka wuxuu ka soo horjeedaa mabaadiida saldhiga u ah kalasooc la'aanta. Mabda'a kalasooc la'aanta waa mabda'a udubdhexaad u ah xuquuqda beniaadanka. Waxaa looga hadlaa dhowr cahdi xuquuqda beniaadanka iyo cahdiyada QM oo kala ah Xuquuqda rayadka iyo siyaasadee ama xuquuqda dhaqaalaha, bulshada iyo dhaqanka. Mabda'a kalsooc la'aanta wuxuu ku qoran yahay go'aamada guud waxaanu si cad loogu muujiyay maqaalo gaar ah. Hal tusaale oo go'aan gaar ah waa cahdiga dumarka qodabkiisa 5 (a) oo oranaya dadka qaatay cahdigan waxay qaadanayaan dhammaan talaabooyinka ku haboon si loo beddelo caadooyin bulsheed ama dhaqameed «iyadoo danta tahay in la ciribtiro fikradaha xun iyo caadooyinka iyo dhaqamada iyo wax alla wixii caadooyin ah oo ku dhisan ismoodsiinta ah in ragga iyo dumarka uu mid ka qiimo yar yahay kan kale iyo fikradaha siinaya ragga iyo dumarka kaalimo go'an».

Waxaa xataa la magacaabayaa xaqa loo leeyahay nolol khaas ah, sida ku qoran qodobka 8 ee cahdiga xuquuq-

da beniaadanka ee Yurub. Waxa uu ka hadlayo waxaa kamid ah xaqa loo leeyahy in qofka loo badbaadiyo ishaysashadiisa jireed iyo nafsadeed. Naafeynta xubinta taranka wuxuu noqon karaa faragelin lagu sameeyay xaqa nolosha khaaska ah.

Sharciga ku saabsan naafeynta xubinta taranka

1995 wuxuu baarlamaanka go'aamiyay sharciga ku saabsan naafeynta xubinta taranka (sharciga 15 Disember 1995 lambar. 74). Sharciga wuxuu mamnuucayaa naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha. Qofkii ku xadgudba sharcigaas, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ama xarig udhaxeeya 3, 6 ilaa 8 sanno, waxay ku xirantahay culeyska dhibaatooyinka uu keeno qaliinka. Gabadha ama naagta nafteeda lama ciqaabi karo.

Naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha wuxuu horayba u ahaa mid ciqaab lagu muto, laakiin markaasi waxaa lagu ciqaabi jiray sharciga ciqaabta, sharciga takhaatiirta iyo sharciga carruurta, danta laga leeyahay sharciga cusub waxay qeyb ahaan tahay in lagu cadeeyo su'aalaad qaarkood oo shaki ka jiray qeebta kalena ay tahay in la muujiyo mowqifka ka fogaashaha ah ee dowlada ay ka taagan tahay naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha.

Sharciga wuxuu qabanayaa qofka si rabitaan ah «u dhaawaca» xubinta taranka ee qof dumar ah ama «gaarsiiya isbeddel joogta ah». Shuruudahaas waxaa buuxin karaa dhammaan nocyada naafeynta xubinta taranka ama dib u gudida dumarka keddib marka ay dhalaan. Haddii naafeynta xubinta tarankaas uu keeno «cudur ama lumin karti shaqo oo waarta in kabadan 2 todobaad» ama « cilad, khalad ama dhaawac aan la daaweyn karin» waxaa lagu ciqaabaa xarig ah ilaa 6 sanno. Shuruudahaas waxaa lagu buuxin karaa marka xubinta taranka dumarka la jaro oo dhaawacana aan sidiisii lagu soo celin karin. Haddii naafeynta xubinta tarankaasi uu keeno «dhimasho ama dhaawac aad u weyn ee jireed ama fayaqabka» waxaa lagu xukumi karaa ilaa 8 sanno oo xarig ah.Shardiga ah dhaawac weyn waxaa lagu gaari karaa marka qofka dumarka ah dhaqaaqa uu dhibo ama aad loo foolxumeeyo, ama ay lumis tarankeedii ama loo geysto dhaawac nafsadeed. Shuruudahan waxay ku buuxsami karaan noocyada naafeynta xubinta taranka badidood, gaar ahaan iyadoo weliba dhaawac hore mooyaan ay dhibaatooyin wakhti danbe imaan karaan. Waxa qiima ah kuma fadhido in gabadha ama naagta ay iyadu doonaysay naafeynta xubinta taranka iyo in kale. Ogolaashadu kama badbaadineyso ciqaabta. Qofka ka qeybqaata in qof dumar ah laga naafeeyo xubinta taranka waxaa loo ciqaabayaa sida qofka sameeyay naafeynta xubinta taranka. Tani waxay wadataa arrin muhiim ah oo ah in waalidka loo ciqaabi karo haddii si toos ah ama si dadab ah uga qeybqaateen in gabadha ama naagta la guddo. Wax badan looma baahna si loo helo ka qeybqaadashada sida sharciga uu ka hadlayo. Xadka waa laga gudbayaa haddii walidka ay ku cadaadiyaan ama ku qanciyaan gabdhahooda in loo guddo.

Sharciga wuxuu khuseeyaa Norwey iyo dibadaba. Tasi macnaheedu wuxuu yahay in kan sameeyay naafeynta xubinta taranka iyo kan ka qeybqaatayba, oo haysta dhalashada norweejiga ama gurigiisu yahay Norwey lagama dhaafin ciqaabta xataa haddii guddniinka naftiisa lagu sameeyo xadka dalka dibadiisa.

Goosha 1: Ka hortaga in gabdhaha deggan Norwey aan lagu sameeynin naafeynta xubinta taranka

Naafeynta xubinta taranka waa arrin isku dhafan oo xasaasi ah.Waxyaabaha ay taabaneyso waxaa kamid ah dumarka iyo carruurta xuquuqdooda la xiriirta kaalimaha ragga iyo dumarka, caafimaadka iyo kacsiga. Waxay noqon karta waxyeelo haddii bulshada norweejiga ay ixtiraamto oo keliya caadada oo kuwa baddan oo ka mid kuwa kudhaqma ay u arkaan inay xanuun badan tahay oo dhib badan tahay in laga hadlo – islamarkaasna kuwa kale ay isla dhaqanka yihiin ay iska indhatirayaan. Waxay xataa noqon kartaa in qoyska ay haysato dhibaatooyin kale oo muhiim ah sida dhibaatada ah helidda hoy iyo dhibaatada ah shaqo helidda. Dhibaatooyinkan danbe waxaa laga yaabaa in loo arko kuwa loo baahan yahay in marka hore la xaliyo inta aan la soo qaadin dhibaatada naafeynta xubinta taranka. Waxay u baahan kartaa aqoon fiican ee luqadeed, turjubaan iyo faham dhaqameed oo noqon karaan lagama maarmaan si loo gaaro wadahadal fiican.

Dumar badan ee lagu sameeyay naafeynta xubinta taranka oo ay haysato dhibaatooyin caafimaad, ma oga marka ugu horeysaba xiriirka ka dhexeeya naafeynta xubinta taranka iyo xanuunka haya. Haddii ay helaan daweyn ku haboon iyo xanaano fiican wey arki karaan xiriirka ka dhexeeya. Tani waxay islamarkaas noqon kartaa ka hortag si dumarkaasi aysan uga qeybqaadan in gabdhahooda laga naafeeyo xubinta taranka.

Hawlaha caafimaadka waxaa saaran xil gaar ah oo ah hawsha ka hortaga. Kontoroolka caafimaadka carruurta waa hawl uu sharciga go'aamiyay oo waajib ku tahay degmooyinka iney bixiyaan. Kontoroolka caafimaadka waa deeq ikhtiyaari ah sida dhamaan deeqaha kale ee caafimaadka ee la siiyo dadweynaha. Maanta waxaa la sameeyaa kontorool caafimaad oo balaaran marka carruurta ay jirto 2 sano iyo dabadeed marka ay 4 sano jiraan. Baaritaankan waa ikhtiyaari maanta waxaan oran karnaa 100% waa la tagaa deeqda saldhiga caafimaadka. Inta yar ee aan tegin waxaa loo galaa hawl badan si walidiinta ay ugu faa'iideystaan deeqda. Saldhiga caafimaadka sida ugu dhaqso badan oo suurogal ah ayuu u raadiyaa inuu abuuro xiriir kalsooni ee waalidiinta oo wuxuu fahamsiiyaa faa'iidada ay leeyihiin kontoroolada.Waa muhiim in la abuuro kalsooni u dhexeysa hawlaha caafimaadka iyo hooyada hadda dhashay oo halka ayay ku soo qaataan su'aasha la xiriirta fikrada ay ka qabto arrimaha ilamaheeda la xiriira iyo xataa naafeynta xubinta taranka.

Aqoon kor u qaadida waddotusaha shaqaalaha caafimaadka Norwey ee naafeynta xubinta taranka dumarka wuwuu kormeerka caafimaadka (helsetilsyne) soosaarayaa wareegto looga hadlayo laguna qeexayo hawsha ka hortaga naafeynta xubinta taranka iyo la socodka gabdhaha lagu sameeyay naafeynta xubinta taranka. Wareegtada waxay kaloo ka hadleysaa hawlaha daryeelka uurka, saldhiga caafimaadka, hawlaha caafimaadka dugsiga iyo takhtarka qofka..

Hawsha la xiriirta naafeynta xubinta taranka waxaa muhiim ah in shaqaalaha caafimaadka ay ka warbixiyaan waajibka-xog-qarinta (taushetsplikten) iyo waxa laga wado. Tani waxay wax ka tari kartaa in wadahadalka uu noqdo mid furan. Inkasto waajibka-xog-qarinta loo qaato Norwey wax caadi ahoo la wada yaqaan, khibrada ay qabaan shaqaalaha caafimaadka waxay muujinaysaa in tani aysan caadi u ahayn dadka ka yimid dal looga dhaqmo naafeynta xubinta taranka.

Heyadaha dowladda gudaheeda sida waaxaha caafimaadka iyo bulshada, dugsiga, beerta xanaanada carruurta, adeega maadinta carruurta iyo boliiska waxaa loo baahan yahay aqoon dheeri ah oo ku saabsan kooxaha tirada yar iyo naafeynta xubinta taranka. Si arrinta loogu daro ajendaha oo laga dhigo shaqada la xiriirta hawshan mid la ogyahay waxaa la isku casumi doonaa kulan wadahadal ee heer qaran ah gu'ga 2001. Wadahadlkaasi waxaa ka qeybgeli doona waxaha dowladda, ururada iyo kooxaha kale oo ka shaqeeya arrimahan weye kuwa loo danleeyahay. Danta laga leeyahay wadahadlkan waxay tahay in la keeno aqoon cusub oo ah mid qarameed iyo mid caalami ah, iyo in laga warbixiyo qorshaha waxqabad iyo waxa la qaban doono mustaqbilka.

Dhammaan dadka shaqadooda darteed la leh xiriir gabdho ka yimid dal looga dhaqmo nafeeynta xubinta taranka waxaa quman inuu garan karo xaaladaha sheegaya in gabar ay khatar ku jirto, iyo calaamad ah in dhawaan la sameeyay naafeeyn xubin taran. Waa in la siiy-

aa tababar la xiriira hawlaha ka hortaga wakhtiga dheer iyo sidii wax looga qaban lahaa xaaladaha la doonayo in degdeg wax loo qabto. Shaqaalaha dowladda waa inay yaqaaniin meesha ay gabdhaha kula talin karaan oo ay la xiriiraan haddii ay u baahan yihiin kaalmo iyo garab.

Dugsiga wuxuu ku jiraa kaalin muhiim ah marka laga hadlayo hawsha ka hortaga. Waa ududbdhexaad in macalinku uu leeyahay aqoonta lagama maarmaanka ah oo si fiican wax looga qabto arrinta. Waa inay yaqaanaan saldhiga caadadan iyo siyaabaha lagu garto naafeynta xubinta taranka si ay u kaalmeeyaan gabdhaha laga naafeeyay xubinta taranka. Wadashaqeyn lala yeesho adeega caafimaadka dugsiga waa ududbdhexaad iyo weliba gaar ahaan marka laga hadlayo dabagalka caaqibooyinka jireed iyo kuwa nafsadeed. Waa in dugsiyada iyo degmooyinkaba laga adeegsadaa, guddiyo ka kooban xirfadlayaal kala duwan si loo xoojiyo shaqada macalimiinta iyo talobixiyayaasha ku hawshaysan dhibaatooyinkan. Talooyinka waxay xataa noqon kara kuwo ka qeyb ah hawsha warbixineed iyo faafinta khibrada arrintan. Wax adag bey noqon kartaa in waxbarashada looga hadlo naafeynta xubinta taranka, tusaale ahaan sida iyadoo ka qeyb ah waxbarashada guud ee kacsiga. Si sahal ah ayey u fidi kartaa dhaqan ah qaadasho fikrad aan sax ahayn oo, gabdhaha waxay la kulmi karaan su'aalo iyo cay kaga timaada ardada kale e dugsiga iyo dibadaba. Fasalo badan waxay isla markaasi noqon kartaa sax in lagaga hadlo arrinta si taxadar leh iyadoo lala hadlayo kooxda ay taabanayso arrintan sida ay umaleynayaan inay ugu fiican tahay in wax looga qabto arrintan. Waxaa quman in dugsiga uu xataa qaado talaabooyin uu kula hadlayo waalid weliba isagoo kalatashanaya dad karti leh oo aqoon u leh dhaqanka iyo afkaba.

Sharciga maadinta carruurta (barnevernloven) wuxuu noqon karaa mid la adeegsan karo. Danta sharciga waa hubinta in carruurta iyo dhalinyarada ku nool xaalad uu ku xumaan karo caafimaadkooda iyo koriinkooda, inay helaan kaalmada iyo xannaanada lagama maarmaanka ah wakhtiga saxda ah. Naafeynta xubinta taranka gabdhaha waa in loo tixgeliyaa sida fal ciqaab mudan oo dhaawac u geysanaya caafimaadka iyo koriinka gabdhaha. Sidaas darteed tuhun ku saabsan naafeyn xubno taran wuxuu maadinta carruurta siinayaa sabab ay ku falgeliyaan baaritaan oo markaasna ay ku qaataan talaabooyinka loo baahan karo si looga hortago naafeynta.

Sida ay qabaan § 6-7 qeybta seddexaad ee sharciga maadinta carruurta waxay adeega maadinta carruurta siin karaan warbixin ay ku dheehan tahay waajibka xogqarinta xubno-maamul oo kale marka tan ay lagama maarmaan tahay si ay ku qabtaan waajibka maadinta carruurta ama ay ka hortagaan khatar weyn ee nafeed ama dhaawac halis ah oo ku yimaada qof caafimaadkiis. Go'aankan wuxuu siin karaa adeega maadinta carruurta oggolaasho ah inay siiyaan boliiska warbixin la xiriirta naafeyn xubno tarmo ee lagu talo jiro in la sameeyo. Ilaa xadkee bey adeega maadinta caruurta ay siinayaan warbixin boliiska waa in si dhab ah loo qiimeeyaa kiis walba goonidiis.

Qorshaha waxqabad wuxuu qorsheynayaa in laga shaqeeyo qalab warbixin iyo isgaarsiin oo hoos yimaada mashruuca. Tan waxay yeelanaysaa waxtar qarmeed oo waxaa ka faa'iideysan kara dhammaan kuwa ku hawshaysan arrintaan. Habka ugu sareeyo ee wadaxiriir wuxuu khuseynayaa mashruuca. Marka laga shaqeynayo qalabka waa in la hubiyaa in warbixinta ay tahay mid la fahmi karo, isku habeysan, aamin leh, oo la heli karo kuna haboon kooxda loogu talagalay.

Talaabo waxqabad 1.1
Xukuumadda waxay turjumeysaa sharciga diidaya naafeynta xubinta taranka ee 1995 oo ay ku turjumeyso afafka ay khuseyso (xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka)

Talaabo waxqabad 1.2
Xukuumadda waxay qabanqaabineysaa kulan heer qaran ah ee looga hadlayo naafeynta xubinta taranka gabdhaha gu'ga 2001 si ay uga dhigto hawsha ka hortaga naafeynta xubinta taranka mid la wada ogyahay iyo bixinta aqoon dheeri ah ee ku saabsan sidii loo wadi lahaa hawshan Norwey.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaaradda carruurta iyo qoyska)

Talaabo waxqabad 1.3
In la diyaariyo warbixino ku wajahan gabdhaha ku jira khatarta ah in laga naafeeyo xubinta taranka oo ku saabsan meesha ay ka heli karaan kaalmo.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 1.4
In la diyaariyo warbixino iyo talaabooyin xiriir ee ku socda kooxaha ka yimid meelaha dhaqan ahaan looga dhaqmo caadada naafeynta xubinta taranka oo ku saabsan waxa uu yahay naafeynta xubinta taranka iyo dhaawaca uu keeno. Warbixinadan waxaa lagu soo saari doonaa dhowr af. (xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Tallabo waxqabad 1.5
In la diyaariyo warbixino iyo talaabooyin xiriir ee ku saabsan naafeynta xubinta taranka ee ku socda caawiyaaasha dowladda u shaqeeya. (xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 1.6
Waxaa muhiim ah in kuwa ka shaqeeya laamaha dowladda sida shaqaalaha caafimaadka, shaqaalaha bulshada, macalimiinta beeraha xanaanada carruurta iyo dugsiyada iyo boliiska ay leeyihiin aqoon ku saabsan naafeynta xubinta taranka Xukuumada waxay ku baraarujineysaa machadyada sare iyo jaamacadahaba in ay ku daraan arrintan manhajka waxbarasho ee xirfadahan. Si loo gaaro kuwa dhameystay waxbarashdii ee shaqeeya, waa in arrinta lagu daraa manhajka aqoon-korarsiga (etter- og videreutdanning) meesha ay caadi ahaan geli karto. Wasaaradahana waxay tixgelin dheeri ah siin karaan arrintan marka ay diyaarinayaan qorshaha waxqabad iyo kordhinta aqoonta ee sanadeed.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaarada kaniisadaha, waxbarashada iyo cilmibaarista oo wadashaqeyn la yeelaneysa wasaaradaha kale)

Talaabo waxqabad 1.7
Si joogta ah ayaa loo qiimeynayaa baahida sharci-beddelid ee dhulal badan. Su'aalaha noocaas ah waxay soo baxaan marka la helo khibrad marka hay'adaha ay fulinayaan qorshaha waxqabad. (xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Goosha 2: kaalmeynta gabdhaha iyo dumarka horay looga naafeyay xubinta taranka

Sharciga soo baxay 2 Luulyo 1999 ee lambarkiisu yahay 62 ee ku saabsan xuquuqda bukaanka, dhaqan galayna 1 Jenaayo 2001, wuxuu dhamman dadka deggen Norwey siinayaa xaq ah kaalmo caafimaad ee lagama maarmaan ah oo ay ka helaan adeega caafimaadka degmada iyo adeega caafimaadka khaaska ah. Sidaas darteed dumarka iyo gabdhaha laga naafeeyay xubinta taranka waxay xaq u leeyihiin daweynta lagama maarmanka ah sida uu qabo xeerka.

Sharciga soo baxay 2 Luulyo 1999 ee lambarkiisu yahay 64 oo ku saabsan shaqaalaha caafimaadka oo isaga xataa dhaqan galay 1 Jenaayo 2001, wuxuu habeynayaa fulinta xirfada shaqaalaha caafimaadka. Shaqaalaha caafimaadka waxay la kulmi karaan bukaan horay looga naafeeyay xubinta taranka. La socdka caafimaadka ayaa markaas isha lagu haynayaa. Waxaa xataa soo bixi kara su'aalo kale oo aan ku saabsanayn caafimaadka, oo ay kamid noqon karaan in shaqaalaha caafimaadka ay qumantahay inay u yeeraan kuwa kale, sida maadinta carruurta ama boliiska, oo noqon karta in la baajiyo in la sameeyo naafeyn xubno taran ama in lala socdo qof lagu sameeyay naafeyn xubin taran. Xeerka sharciga shaqaalaha caafimaadka ee ku saabsan waajibka-xog-qarinta, waajibka-warbixinta iyo xaqa-warbixinta ayaa udubdhexaad ah marakan.

Marka la qiimeynayo in la qaado talaabooyin la xiriira sharciga maadinta carruurta, iyo hadii ay saas tahay talaabadee baa la qaadaa, waxaa culeyska la saarayaa waxa u fiican ilmaha, eeg § 4-1. Ilaa xadkee baa la qaadaa talaabooyin la xiriira maadinta carruurta marka la sameeyay naafeyn xubino taran waxay ku xiran tahay xaaladda iyo baahida xaalad walba. Marka go'aanka la gaarayo, waa xaalada ilmaha ay ku sugan yihiin waxa la tixgelinayo. Inkastoo la sameeyay naafeynta xubinta taranka, waa lagu fekeri karaa in ilmaha ay u baahan yihiin talaabooyin waafaqsan sharciga maadinta carruurta. Naafeynta xubinta taranka waxaa laga yaabaa inay u geysatay ilmaha dhaawac dareemeed iyo nafsiyeed marka laga soo tago kan jireed. Wayoo ilmaha waalidkood sida caadiga ah lug bay ku leeyihiin naafeynta xubinta taranka ee ilmaha iyagoo aaminsan in tani ay u fiican tahay ilmaha, waxay noqon kartaa in waalidka naftiisa uusan ahayn mid arki kara ama daryeeli kara baahida ilmaha markani. Markaas waxaa loo baahan karaa talaabooyin ka yimaada dhanka adeega maadinta carruurta, oo hor iyo horaan leh qaab kaalmo ikhtiyaari ah.

Si loo gaaro goosha ah in la baajiyo naafeyn xubnotaran iyo in la kaalmeeyo kuwii ay horay ugu dhacday waa inaan abuunaa kalsooni na dhexmarta waalidka haysta ilmo laga naafeeyay xubinta taranka. Waa muhiim in iyaga iskuduubnidooda loo arko – hal qoys oo kaalmo u baahan. Waa muhiim in la siiyo aqoon kooxdan ee u baahan warbixin si ay u fahmaan oo ay u noqdaan kuwo beddeli kara aragtida ay ka qabaan arrintan.

Waddo-tusaha shaqaalaha caafimaadka Norwey, oo uu soo saaray kormeerka caafimaadka dowladda, ee ka hadlaya naafeynta xubinta taranka dumarka waxyaabaha ku qoran waxaa kamid ah warbixino balaaran ee ku saabsan baaritaano iyo daweyn lagu sameeyay gabdho la guday, iyo ka hortaga naafeynta xubinta taranka gabdhaha. Uurka iyo xannaanada foosha ayaa udubdhexaad u ah hawshan. Maadaama sharciga norweejiga uu mamnuucayo in lagu celiyo sidiisii xubinta taranka la naafeeyay, waxaa dumarka u gudan sida fircooniga ah lagu sameeynayaa qaliin furitaan marka ay foolanayaan. Waxaa intaa dheer in la daboolo baahidooda warbixin iyo waddo-tusid.

Kormeerka caafimaadka dowladda wuxuu xag qaliin aasaas ka dhigayaa in caadi ahaan laga hadlayaa qaliin sahlan oo dhammaan isbitaalada leh qeybta foosha ay leeyihiin aqoon ay ku sameyn. Haddi loo baahdo qaliinka-qurxinta (Plastisk-kirurgi) wuxuu isbitaalka u gudbin karaa isbitaalka gobolka sida caadiga ah iyadoo kiis walba goonidiisa loo qiimeynayo.

Dhaqancelinta waxay qaadaneysaa wakhti kabadan qaliin/jinokoloji xadadan oo in badan oo hawshaan ah waxaa lagu sameyn karaa adeegyada caafimaadka ee jira, marka kor loo qaado aqoonta dhulkan la xiriirta.

Ma lihin maanta aragti guud oo ah immisa dumar ayaa lagu sameeyay qaliin furid ama noocyo kale oo dhaqancelin ah oo ka baxsan marka ay dhalayaan, ama immisa bay la ektahay baahida. Waxay noqon kartaa deeq balaaran oo caafimaadeed, oo ay ku jirto sida wax looga qabanayo, ha ahaato falalka nafsadeed, isku dhac jiil iyo isku dhacyo kale ee guriga guddihiisa. Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka waxay sameeyneysaa qiimeyn sugan ee baahidaas sharci siiya xaqa daweynta, keddib markii la sameeyay naafeyn xubin taran, iyo weliba guud ahaan xaqa kaalmada caafimaad ee lagama maarmaanka ah.

Markii laga doodayay wargelinta baarlamaanka St.meld. nr.17 (1996-97) ee la xiriirta soogalootiga iyo dhaqamada kala duwan ee Norwey waxaa la go'aamiyay in la dhiso xubin-aqoon la xiriirta caafimaadka jirka iyo nafsada iyo xannaanada dadka soogalootiga ah. Carruurta iyo dhalinyarada waxay ahayeen koox muhiim ah ee loola jeeday soo jeedintaasi.

Iyadoo la dabajooga taladaasi ayaa wasaaradda bulshada iyo caafimaadka waxay soo jeedisay in xubint-aqoon ay quman tahay in loo sameeyo sida hab-iskuxiran oo isku xiraya bey'adaha xirfadeed iyo xirfadlayaasha oo leh abaabulo kala duwan iyo iyagoo dalka ku firiirsan, lehna wadashaqeyn abaabulan ee ku kooban hawl ay wadaagaan oo leh maamul dhexe.

Wasaaraddu waxay dooneysaa inay xubinta-aqoon ay ku xirto daweynta guud, iyadoo isla markaasna la dhowrayo wadashaqeynta ka dhexeeysa xirfadaha kala duwan iyo isu soo dhaweynta qeybaha kala duwan. Waa caadi in marka la abuurayo xarun la eego koboca aqoonta gaarka ah ee la xiriirta naafeynta xubinta taranka gabdhaha iyo dumarka.

Maamulka dhexe ee isku xira waxaa lagu taliyay in laga dhigo Senter for internasjonal helse, Klinikk for forebyggende medisin, cisbitaalka Ullevål.

Talaabo waxqabad 2.1
Xukuumadu waxay sameeyneysaa qiimeyn sugan oo ku saabsan baahida loo qabo xaq dawo sharciyeeysan ee naafeyn xubin taran keddib. (xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka)

Talaabo waxqabad 2.2
In la diyaariyo warbixino iyo talaabooyin-xiriir ee ku socda kuwa laga naafeeyay xubinta taranka iyo qoyskooda (waalidka, qofka ay isu dhaxaan iyo dad kale oo xanaaneeya) oo ka hadlaya dhaawacyada ka yimaada naafeynta xubinta taranka iyo xagee laga helaa kaalmo. Buugagtaasi waxaa lagu soo saarayaa dhowr af. (xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 2.3
Buuga Kormeerka caafimaadka "Veileder for helsepersonell" waxaa laga hirgelinayaa heerka adeega kowaad iyo labaadba. In badan oo kamid ah kuwan waxaa quman in lagu sameeyo qorshe tababar ee haatanba jira. (xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka)

Talaabo waxqabad 2.4
In laga doodo kobcinta aqoonta gaar ahaaneed ee la xiriirta naafeynta xubinta taranka gabdhaha. Laguna daro xubinta-aqoon ee cusub ee caafimaadka jirka iyo nafta, iyo daryeelka la siiyo dadka soogalootiga ah. (xilka fulinta waxaa iska leh: Wasaaradda bulshada iyo caafimaadka)

Goosha 3: Wadashaqeynta lala yeelanayo ururada iyo dadka

Caalami ahaan waxaa la doortaa, khad wadashaqeyn intii la adeegsan lahaa khad iskahorimaad marka laga hadlayo naafeynta xubinta taranka Qorshaha waxqabad waxa uu raaci doona isla khadkaas marka laga sameynayo dadaalka dalka.

Guddi wadashaqeyn oo muhiim ah wuxuu noqon karaa Guddiga xiriirka ee ka dhexeeya soogalootiga iyo masuuliyiinta norweejiga (KIM) oo ah guddi ay xukuumadu magacaawday. KIM wuxuu khibrad weyn u leeyahay dhisida kalsooni dhexmarta soogalootiga iyo masuuliyiinta waa wax muhiim ah si loogu guuleysto howsha la dagaalanka naafeynta xubinta taranka. Arrintan waxaa waa hore looga dooday guddigaas, oo KIMna wuxuu ka shaqeyn doonaa dhibaatadan.

Waxaa ka jira ururo, kooxo iyo xiriiro bey'adeed oo ay naafeynta xubinta taranka gabdhaha ay tahay qeyb ka mid ah caadooyinkooda. In badan oo kamid ah kuwaas waxay naafeynta xubinta taranka gabdhaha tahay mid laga hadlo, oo qaarkoodna ay dantooda cad tahay la dagaalanka caadadan. Ka sokow bey'adahan waxaa jira qof qof si cad u muuqday marka laga hadlayo arrinta oo wada hawl warbixin ah. Dad ka tirsan bey'adda ay taabaneyso arrinta waxay leeyihiin waxtar weyn iyo fursado badan oo ay kaga hortagaan hawshan marka loo eego wakiilada ka socda bulshweynta. Sidaas darteed waxbarida qaar kamid ah kooxda loo dan leeyahay waxay noqoneysaa mid muhiim ah, si kuwaasi markooda ay u sii baraan dadkooda dhibaatada ka yimaada naafeynta xubinta taranka. Khibrada laga helay Iswiidhan waxay leedahay inay muhiim tahay in nimanka la siiyo warbixin. Iyagu badanaaba ma yaqaanaan maxay naafeynta xubinta taranka macno u leedahay gabdhaha, waxayna yihiin kuwaa kaalmada ugu badan laga heli karo marka ay ogaadaan waxa ay waxaan yihiin iyo maxay dhibaato leeyihiin.

Bartame waxaa ah mabda'a ah xiriir dhiska iyo wadahadal labada dhinac ah. Warbixinada iyo talaabooyinka-xiriir ee kala duwan waa in la diyaariyaa iyadoo xiriir wanaagsan lagala yeelanayo kooxaha ay khuseyso. Tani waxaa lagu sameeynayaa iyadoo loo marayo kooxaha-shaqo, kulamada-waxbarasho iyo meelaha lagu kulmo. Waxaa xataa muhiim ah in laysku xiro xirfadlayaasha iyo kooxaha ay khuseyso oo ka jawaabi kara su'aalo kala duwan ee la xiriira naafeynta xubinta taranka.

Talaabo waxqabad 3.1
Diyaarinta istraateejiyada iyo fulinta waxbarida wakiilada ka socda kooxaha loo dan leeyahay (xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 3.2
Abuurida kooxo wadashaqeeya si loo hirgeliyo koorsooyin iyo kulamo.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Goosha 4: Ka qeybqaadashada la dagaalanka naafeynta xubinta taranka ee caalamka

Iyadoo la barbar wado dadaalka xukuumada ee dalka gudihiisa, waxaa muhiim ah in la taageero iyo hawlaha caalamiga ah ee u dhigma kuwan. Khibradu waxay muujineysaa in kooxaha soogalootiga badanaaba ay u jiheystaan xaga dalka ay qolo ahaan ka tirsan yihiin marka laga hadlayo diinta iyo caadooyinka dhaqameed. Sidaas darteed waxay noqoneysaa muhiim in la muujiyo in arrinta ay tahay xataa mid caalami ahaan looga doodayo iyo talaabooyin la taaban karo ee ka socda dalalka kooxo badan oo soogalooti ah ay ka yimideen.

Norwey waxay taageyrtaa talabooyin dhowr ah ee dhowr-dhinacle ah iyadoo u sii mareysa QM oo arintani ay ugu jirto ajendaha, iyo kuwo labo-dhinaclaha ah iyadoo loo sii maro ururo ikhtiyaari ah ee ka shaqeeya dal ay ka jirto caadadan iyo iyadoo si toos ah loo taageero ururada meesha ka jira. Xag siyaasadeed waxay Norwey si waxkuool ah uga qeybqaadataa shirarka caalamiga ah, kulan sanadeeka QM, Guddiga xuquuqda aadamiga ee QM iyo Guddiga haweenka halkaas oo arrinta sida dumarka iyo caafimaadka taranka, waxyeeleynta dumarka iyo kalasooca kd. waxay ku jirtay ajeendaha. Kulamadaasi waxaa laga soo saaraa hadal loo wada dhanyahay iyo barnaamijyo waxqabad oo ay ku jirto naafeynta xubinta taranka ee dumarka. Norwey waxay taageertaa hawlaha dhaqan abuurista ee xuquuqda beniaadamka iyadoo kaalmo siisa hay'adda xuquuqda beniaadamka ee QM, oo ay kamid tahay xuquuqda dumarka iyo gabdhaha.

Marka ururada caalamiga ah ay bilaabeen inay ka hadlaan dhibaatada uu leeyahay naafeynta xubinta taranka ee dumarka mar hadda labaatan sano laga joogo, waxay la kulmeen ka horimaad kaga yimid dalalkii ay taabaneysay arrintan. Waxay sababtu ahayd iyagoo adeegsaday khad iskahorimaad ah. Keddib tan waa la beddelay. Wayoo waxaa la arkay inaan meel lagu gaareyn. Hadda waxaa lagu tashadaa wadahadal iyo wadashaqeyn, oo Norwey ay taageerto khadkan. La dagaalanka naafeynta xubinta taranka ee dumarka waxaa loo arkaa sida mid qeyb ka ah shaqada lagu hagaajinayo caafimaadka taranka iyo dagaalka lagula jiro waxyeeleynta dumarka. Sidaas ayaa xataa xuquuqda beniaadamka dumarka ee dalalkaasi oo loo dhowrayo si ka fiican sidii hore.

Xukuumadu wey sii wadeysaa taageerista ururada ikhtiyaariga ah ee si waxkuool ah uga shaqeeya arrintaas. Xataa halkan waxaa quman in naafeynta xubinta taranka loo arko si ishaysata oo ku xiriirsan hawlaha heerka dumarka iyo caafimaadka taranka, iyo wanaajinta xuquuqda beniaadamka. Iyadoo loo marayo xiriir balaaran ee ka dhexeeyay xiriirada ka jira Norwey, dalalka kale iyo caalamka, ayaa lagu heli karaa khibrado laba-dhinaclaha ah ee hirgalinta qorshaha waxqabad qarameed ama caalami.

Talaabo waxqabad 4.1
Xukuumadu waxay sii wadeysaa inay ku hayso heer sare ee golayaasha dhowr-dhinac ah halkaas oo naafeynta xubinta taranka dumarka ay ugu jirto ajeendaha.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 4.2
Xukuumadda waxay sii xoojineysaa wadashaqeynta laba-dhinaclaha ah ee dalalka Afrika e ka shaqeeya ka hortaga naafeynta xubinta taranka ee gabdhaha ee dalka gudihiisa.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Talaabo waxqabad 4.3
Xukuumada waxay raadineysaa inay la yeelato wadashaqeyn ururada-daneed ee dalalka loo dan leeyahay oo kaalmeyn kara gabdhaha soogalootiga ah oo la geeyay dalkii waalidkooda si looga naafeyo xubinta taranka, oo codsanaya kaalmo.
(xilka fulinta waxaa iska leh: Mashruuca)

Mashruuc qeyb ka ah qorshaha waxqabad ee ka hortaga naafeynta xubinta taranka

Qeyb weyn oo kamid ah qorshaha waxqabad waxaa loo hirgelinayaa sida mashruuc lagu dhisayo aqoonta iyo tijaabinta hababka looga hortagay naafeynta xubinta taranka. Mashruuca aya naafeynta xubinta taranka ee dumarka geeynaya xiriir balaaran halkaas oo ay dantu tahay in la siiyo dumarka qeeb koreeya iyo caafimaad. Koox-karti qarameed iyo hoggaamiye mashruuc ayaa loo xil saarayaa inay horumariyaan buugag iyo hay'ado kala duwan.

Mashruuca guud guddihiisa waxaa la hirgelinayaa mashruucyo goobeed oo si balaaran islamarkiiba wax uga qabta dhowr heer ee nololeed. Tani waxay si gaar ah u khuseeysaa mujtamaca soomaalida oo dhul badan kaga jira meesha ugu danbeysa.

Mashruucu wuxuu soconayaa 3 sano waxaana lagu fulinayaa wadashaqeyn dhexmarta dhowr wasaaradood. Waxaa la magacaabayaa koox-karti oo leh:

- Wakiilo ka socda dalal kala duwan
- Wakiilo ka socda laamaha la kulma kooxda loo dan leeyahay
- Dad aqoon gaar ah leh

Kooxda-karti waxay ku shaqeyneysaa si waafaqsan danta qaranka.

Waajibaad qarameed

- Ka qeybqaadasho dhisida aqoon gaar ah ee xubin ka ah xarunta cusub ee aqooneed
- Diyaarinta qalab warbixin iyo xiriir
- Diyaarinta koorsooyin la siinayo shaqaalaha dowladda.
- Diyaarinta istaratejiyadeed wax lagu barayo qaar kamid ah dadka loo dan leeyahay.
- Fulinta seminaaro iyo wadahadalo
- Abuurida xiriir qaran iyo wadashaqeyn lala yeesho xiriirada caalamiga ah
- In loo qiimeeyo si joogto ah baahida loo qabo sharci-beddelid.

Mashruuc goobeed

Waxaa la abuurayaa hal mashruuc goobeed oo ka shaqeynayo degmada Oslo. Kooxda loo dan leeyahay mashruucan waa isla kuwa loola dan leeyahay mashruuca guud. Dad badan oo soomaali ah ayaa ku jira dabaqad hoose marka la eego mujtamacweynaha oo sidaas darteed mashruuca goobeed wuxuu raadinayaa inuu isku daro dhowr heer-nololeed islamarkiiba. Tan macnaheeda waxay tahay in mashruuca uu eegayo xaaladda kooxdan marka laga hadalayo xuquuqda beni'aadamka guud ahaan, caafimaadka, dugsiga iyo waxbarashada, danbiyada dhalinyarada iyo maadinta carruurta. Qaabeynta dadaalka mashruuca waxaa la sameyn doonaa iyadoo wadashaqeyn soke lala yeelanayo kooxda loo dan leeyahay.

Waajibaadka goobeed

- Abuuris shabakad xiriir ee kooxaha kala duwan loo dan leeyahay.
- U shaqeyn si wax ku'ool ah si loo beddelo dhaqanka kooxaha ku dhaqma naafeynta xubinta taranka
- Ogaashaha iyo gudbinta baahida ay qabaan kooxaha loo dan leeyahay
- Abuurid kooxo wadashaqeyn si loo hirgeliyo koorsooyinka iyo kulamada.
- Ka shaqeynta kiisas keli keli ah
- Isugudbinta khibradaha laga helo shaqada

Abaabulka mashruuca

Abaabulka wuxuu ku saleysan yahay khibrado laga helay Iswiidhan. Mashruuca wuxuu isku dhafayaa dano dhexe iyo tijaabin goobeed ah. Tani waxaa loo sameynayaa iyadoo la abaabulayo wadashaqeyn dhexmarta ma'suuliyiinta dhexe oo dejinaya xeendaabka guud ayna saarantahay masuuliyad rasmi ah ee mashruuca. Tani waxaa lagu xiriirinayaa mashruuc fulin oo goobeed ah oo xad guud loo dhigay laakiin go'aansanayse sida loo fulinayo. Mashruuca waa in laga dhigaa Oslo, lana fuliyaa iyadoo lala shaqeynayo degmada Oslo. Qof hoggaamiye mashruuc iyo qof caawiye mashruuca ayaa noqonaya xubinaha xiriirinaya. Intaas keddib waxaa la abuurayaa koox-karti oo ku hareereysan labadaas qof. Mashruuca waa la qiimeynayaa.

Waxaa la magacaabayaa guddi ka kooban wasaaradaha oo noqonaya guddiga-hoggaanka wuxuuna u xil saaran yahay inuu la socdo dhamaan qorshaha waxqabad.

Wasaaradda carruurta iyo qoyska waxaa dulsaaran xilka maamulka, oo ay kamid tahay shaqaaleynta hal hoggaamiye mashruuc iyo hal caawiye mashruuc, iyo wargelinta iyo warbixinta u dhexeysa mashruuca iyo kooxda-hoggaaminta.

Hoggaamiyaha mashruuca waxaa saaran dhammaan xilka mashruuca. Xilka hawlaha qaran iyo hoggaaminta kooxda-karti xataa waxay saaran tahay jagadan.

Caawiyaha mashruuca wuxuu xil-wadaag ka yahay mashruucyada goobeed, oo wuxuu xataa ka qeybgelayaa kooxaha-kartida. Ugu yaraan mid kamid ah labada shaqaale ee mashruuca waa inuu ka yimaadaa dal kamid ah dalalka Afrika oo ay taabaneyso naafeynta xubinta taranka.

Labada shaqaale ee mashruuca waxaa quman inay xafiis wadaagaan oo ku xiriirsan hal bey'ad oo jirta.